

Shopping with your eWIC Card

Somali

SU'AALAH?

Marka ay tahay in la waco xaruntaada WIC

- Marka aad hayso su'aalo ku saabsan cuntotoyinka WIC.
- Marka aad u baahan tahay in aad qabsato ballan si aad u hesho gargaaro cusub.
- Marka aad awoodi waydo in aad gadato shay cuntada WIC ah.

Marka ay tahay in la waco Adeega Macmiilka eWIC


- Marka kaarkaagu lumo, la xado ama waxyeelo soo gaarto.
- Marka aad rabto in aad dib u sameyso ama furto PIN lambarkaaga.
- Haddii aad u malaynayso in xaashidaada risiitku aanay u dhigmin waxa aad gadatay.



Waaxdani waa fursad shaqo bixiye loo wada siman yahay. Sida ku cad xeerka Federaalka ee sharciga xuquuqda dadweynaha iyo xeerarka u yaala xuquuqda dadweynaha ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), USDA, waaxyaheeda, xafisyaadeeda, iyo shaqaalaheeda, iyo hay'adaheeda kala duwan ee ka qayb qaadanaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxay ka mammuucaysaa kala takoorida la xiriita jinsiyada, midabka, dalka laga soo jeedo, lab ama dhidig, naafanimada, da'da ama aangoosiga, ama aangoosiga ku saabsan xiriir hore oo lala lahaa dhaqdhaqaaq u dooda xuquuqda dadweynaha oo ka tirsan barnaamij amma hawl ay samaysay ama maal-gelisay USDA. Dadka naafada ah ee u baahan noocyoo kale oo isgaarsiin oo loogu tala galay macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille, farta waaweyn, cajalada la duubo, Nooca Luqadda Dadka aan wax Maqli karin ee Maraykanka, iwm.), waa in ay la xiriiraan Hay'ada (Gobolka ama degaanka) halka ay ka dalbadeen gargaaraada. Shakhsiyaadka aan dhagaha wax ka maqlin, aanan si fiican wax u maqlin karin, ama dhibaato hadal qaba waxay la xiriiri karaan USDA iyagoo isticmaalaya Adeega Gudbinta ee Dawladda Dhexe 'Federal Relay Service' (800) 877-8339. Intaasi waxaa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa suuragal ah in ay jiraan iyagoo ku qoran luqaddo aan ka ahayn Ingirisiga. Si aad cabasho kala takoorida ah u gudbiso, buuxi Foomka Barnaamijka Cabashada Kala takoorida ee USDA (AD-3027) (USDA Program Discrimination Complaint Form), ee laga helo bogga internet-ka: http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, ama xafis kasta oo ay leedahay USDA, ama qor warqad lagu haqajo USDA waxaanad warqada ku bixisaan dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. Si aad u codsato foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Foomka aad buuxisay ama warqada u gudbi USDA adigoo isticmaalaya: (1) Boosta: U.S. Department of Agriculture, Office of the Assistant Secretary for Civil Rights, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410; (2) fax: (202) 690-7442; ama (3) email-ka: program.intake@usda.gov

 
www.healthoregon.org/wic

57-1002 SOM (11/2020)




WAX KU SOO GADASHADA KAARKAAGA eWIC



KOBCINTA MUQTAQBAL CAAFIMAAD LEH

Shopping with your eWIC Card

Somali




**ISTICMAAL
WICSHOPPER
APP**

Isticmaal WICShopper App si aad u:

- Fiiriso lacagta gargaarka ee kuu hartay.
- Hesho is xasuuxin ka hor inta aan gargaarkaaga waqtigiisu dhicin.
- Iskaan gareyso barcode-ka si aad u hesho cuntada WIC.
- Isticmaasho Liiska Cuntada si uu gacan uga geysto helida noocyada iyo qiyasaha saxda ah.
- Hesho dukaamo qaata WIC.
- Raadiso fikradaha habka cuntooyinka loo kariyo.
- Gasho **WICHealth.org** oo u hesho koorsooyinka nafaqada ee internet-ka.

Soo deji WICShopper App oo maanta diiwaan gasho kaarkaaga eWIC!

**oo la helayo isaga oo ah iPhone iyo Android.*



Shopping with your eWIC Card

Somali

Sidee baan u helaa gargaarada WIC?

- WIC waxay bixisaa gargaarada cuntada oo caafimaad leh bil kasta oo aad ka tirsan tahay barnaamijka WIC.
- Waxaa dhici karta in lagu siiyo ilaa 3 bilood ah gargaarada cuntada waqtigiiba.
- Gargaarada xiga si toos ah looguma darin. La xiriir xafiiskaaga WIC sida lagu faray si aad u hesho gargaaro dheeraad ah.
- Wax kaga gado gargaaradaada cuntada WIC dukaanka laga adeegto oo Oregon WIC oggolaatay. Weydiiso xaruntaada WIC liiska dukaamada degaanka ku yaala. Wuxaad sidoo kale sticmaali kartaa website-ka WICShopper App iyo Oregon WIC si aad u hesho dukaan.

Waajibaadkaaga

- Marnaba ha isku dayin in aad gado, ka ganacsato ama bixiso cuntooyinkaaga WIC, caanaha carruurta ‘formula’ ama kaarka eWIC.
- Ha soo celin cuntooyinka WIC ama caanaha carruurta ‘formula’ si aad u weydaarsato lacag, credit ama waxyaalo kale.
- Si xushmad leh ula dhaqan WIC iyo shaqaalaha dukaanka.




Shopping with your eWIC Card

Somali

Ka hor inta aadan wax soo gadan

- Ogow lacagta gargaarka cuntada ee hadda kuu hartay.
 - Iisticmaal WICShopper App
 - Wuxaad xaashidaada risiitka aad wax ku soo gadatay ee u dambaysay ee WIC ka fiirisaa lacagta kuu hartay.
 - Wici kartaa khadka bilaashka ah ee adeega macmiilka: **1-844-234-4946**
 - Lacagta cuntada ee kuu hartay ka fiiri website-ka www.ebtedge.com
- Dib u eeg Liiska Cuntada oo qorsheyso kuwa ay yihiin cuntooyinka aad gadanayso.



Inta aad soo adeeganayso

- Wuxaad gadan kartaa oo kaliya cuntooyinka ay oggolaatay WIC ee ku jira gargaaradaada hadda.
- Iisticmaal Liiska Cuntada, WICShopper App iyo Lacagta gargaarka ee kuu hartay si ay kaaga caawiso in aad doorato noocyada cunto ee kala duwan ee shirkaduhu sameeyaan ‘brands’, noocyada iyo qiyaasaha cuntooyinka oo sax ah.

Marka aad gadato

Haddii ay wax socon waayaan aad ku bixsay WIC, wuxaad shaqaalaha lacagta qabta ‘cashier’ ka codsan kartaa in uu ka saaro iyada ama wuxaad u bixin karaa hab gooni ah.

HADDII AAD KU CUSUB TAHAY WIC:

Marka la joogo laynka wax laga bixiyo, tixgeli in aad cuntooyinkaaga WIC ka soocdo cuntooyinka kale. Ka dibna marka hore bixi lacagta cuntooyinkaaga WIC. Marka aad kalsoonni ku qabto wax ku gadashada WIC, ka dib markaa cuntooyinkaaga WIC waad ku dhex dari kartaa cuntooyinka kale marka aad gadato.

Keydso risiitkaaga si aad u ogaato cuntooyinka kuu haray marka xiga ee aad wax gadato ee loogu talagalay WIC, ama haddiiba ay jiraan dhibaatooyin inta aad ku jirto safarkaaga soo adeegasho.

Shopping with your eWIC Card

Somali

SIDA LOO AKHRIYO RISIITKAAGA

Risiityadu waxay u ekaan karaan kuwo kala duwan marka la joogo dukaan kasta. Risiityada intooda badani waxay leeyihii qaybahani.

Bilowga lacagta gargaarka ee hartay ee WIC

Marka aad mariso kaarkaaga ka dib, dukaamada intooda badani waxay daabacaan risiit muujinaya gargaarada la heli karayay bilowgii safarkaaga soo adeegashada. Haddii ay dhibaato ka jirto cunto aad isku dayayso in aad gadato, isticmaal qaybtani si aad u ogaato haddii aad haysato gargaaro cunto oo jira.

Isticmaalka gargaarka WIC

Kuwani waa cuntooyinka WIC ee aad qorsheynayso in aad gadato. Shaqaalahaa lacagta qabta ‘cashier’ waa in uu ku weydiiyaa in aad hubiso ka hor inta aanan la oggolaanin. Xaqiji in cuntooyinka WIC oo dhan ee aad isku dayayso in aad gadato ay liiska ku jiraan.

Dhammaadka lacagta gargaarka ee hartay ee WIC

Lacagta gargaarka ee ku hartay eWIC wax gadashada ka dib.

Taariikhda gargaarka WIC uu dhacayo

Risiit kastaa wuxuu leeyahay is xasuusinta marka gargaarada bishaada hadda lagu jiraa uu waqtigeedu dhaco. Bil kasta, cuntooyinkaaga WIC waxaad gadataa inta aan la gaarin habeen barka maalinta u dambeysa bisha.

SIDA LOO AKHRIYO RISIITKAAGA

WIC Benefit Balance Before Purchase

1.00	1b	Cheese
2.00	doz	Eggs - large
36.00	oz	Cereal - hot/cold
1.00	ctr	Peanut Butter/beans
32.00	oz	Whole grains
9.00	\$\$	Fruit and vegetables
1.00	can	Sim Adv PWD 12.4 oz
1.00	ctr	Low or nonfat yogurt
3.00	gal	Fat free or 1% milk
2.00	ctr	64 oz bottle juice

WIC Items for Redemption

18.00	oz	G/MILLS CEREAL
16.00	oz	JIF PEANUT BUTTER
32.00	oz	MAHATMA RICE
1.18	\$\$	ORANGES, NAVEL
1.98	\$\$	SPRING MIX

WIC Benefit Ending Balance

1.00	1b	Cheese
2.00	doz	Eggs - large
18.00	oz	Cereal - hot/cold
5.84	\$\$	Fruit and vegetables
1.00	can	Sim Adv PWD 12.4 oz
1.00	ctr	Low or nonfat yogurt
3.00	gal	Fat free or 1% milk
2.00	ctr	64 oz bottle juice

WIC Benefits Expire on 9-30-2020

Shopping with your eWIC Card

Somali

TALOOYIN KU SAABSAN GADASHADA CUNTADA

Gadashada Miraha iyo Khudradda



WIC waxay ku siisaa qadar lacageed si aad u gadato miro iyo khudrad daray ah, la qaboojiyay ama qasacadeysan.

Marka miraha ama khudradda loo gado miisaan ahaan, isticmaal WICShopper App ama xisaabiyahaaga si uu kaaga caawiyo in aad adeegato.

TUSAALE:

Waxaad haysataa \$9.00 oo aad heli karto. Waxaad jeclaan lahayd in aad gadato tufaax. Tufaaxu wuxuu ku kacaya \$1.50/lb.

Adiga oo sticmaalaya miisaanka dukaanka yaala, waxaad arki kartaa in bacdaada tufaaxu ay tahay 2.5 lb.

Adiga oo isticmaalaya WICShopper App ama xisaabiyaha, ku qor:
 $2.5 \times 1.5 =$
Tufaaxagu wuxuu noqon doonaa \$3.75.

Halkan waxaa ku qoran sida ay tanu u ekaan doonto WICShopper App dhexdiisa:

Add Item to Picker

Apples

Weight of items: 2.5 lbs

Price per pound: \$1.5

Total: \$3.75

+ ADD X CANCEL

TALOOYIN KU SAABSAN GADASHADA CUNTADA

Gadashada Noocyada Badarka

Waxaad kala dooran kartaa noocyada badarka ee soo socda:

- 100% roodhiga laga sameeyo qamadiga
- Toortillada fudud ee galleyda ka sameysan
- Toortillada qamadiga laga sameeyo
- Baastada badarka laga sameeyo
- Nooca siriylalka oats
- Bariiska maariinka ah
- Cuntada siriylalka laga sameeyo ‘bulgur’

Gado xirmooyin dhan 16 oz. ama 32 oz. si aad u hesho faa'iidadaada noocyada badarka oo dhan.

Haddii aad haysato noocyada badarka oo dhan 16 oz. ma gadan kartid wax ka weyn 16 oz.

Haddii aad haysato noocyada badarka oo dhan 32 oz. waxaad gadan kartaa hal noocyada badarka oo ah gaaraya 32 oz. ama gado laba noocyada badarka oo kala duwan, oo mid kastaa yahay baakad ah 16 oz, isu geyn ahaan 32 oz.



16 oz.



16 oz.

Shopping with your eWIC Card

Somali

TALOOYIN KU SAABSAN GADASHADA CUNTADA

Gadashada Caanaha iyo Cabitaanka Soy

Remaining Balance (exp date 9-30-2020)		
3.50	gal	Fat free or 1% milk
.75	gal	Whole milk
2.00	ctr	Peanut butter/ dry or canned beans
40.00	oz	Whole grains
16.00	\$\$	Fruit and vegetables
3.00	ctr	Frozen juice 11.5 - 12 oz
1.00	ctr	Bottle Juice 64 oz
1.00	lb	Cheese

Tusaalooyin:

1.00 GAL waa



gallon

0.75 GAL waa



quart

0.50 GAL waa



gallon-barkii

0.25 GAL waa



quart

TALOOYIN KU SAABSAN GADASHADA CUNTADA

Gadashada Ciirta


1 CTR oo Ciir ah waa
32 oz. (2 lb.)

Gado 32 oz. (ama 2 lb.)
ee caagadaha kaliya.



- Haweenka iyo carruurta ka weyn 2 jir waxay helaan ciir duxdu ku yar tahay **LOWFAT** ama dux lahayn **NONFAT**.
- Carruurta u dhaxaysa 1-2 hir waxay helaan ciirta caanaha ka sameysan **WHOLE MILK**.

Isticmaal Liiska Cuntada ama WICShopper app si aad u soo qaadato nooca iyo isku darka saxda ah. Waa maxay nooca ciirta oo ku jirta liiskaaga gargaarka?



Shopping with your eWIC Card

Somali

TALOOYIN KU SAABSAN GADASHADA CUNTADA

Gadashada Looska la shiiday iyo Digirta

Remaining Balance (exp date 9-30-2020)		
3.50	gal	Fat free or 1% milk
1.00	gal	Whole milk
2.00	ctr	Peanut butter/dry or canned beans
40.00	oz	Whole grains
16.00	\$\$	Fruit and vegetables
3.00	ctr	Frozen juice 11.5 - 12 oz
1.00	ctr	Bottle Juice 64 oz
1.00	lb	Cheese

Adiga oo haysta 1.00 CTR waxaad gadan kartaa



AMA



16 oz

AMA



16-18 oz

TALOOYINKA SOO ADEEGASHADA

Haddii aad haysato 2 CTR oo mid ka mid ah kuwani, waxaad u isticmaali kartaa in aad ku gadato 32 ounce oo ah bacaha ay ku jiraan digirta qalalan ama misirta.



32 oz

AMA

1.00	gal	Whole milk
2.00	ctr	Peanut butter/beans
2.00	ctr	Dry beans or peas
40.00	oz	Whole grains

1.00	gal	Whole milk
2.00	ctr	Peanut butter/beans
2.00	ctr	Dry beans or peas
40.00	oz	Whole grains


TALOOYIN KU SAABSAN GADASHADA CUNTADA

Gadashada Siriylalka

Ka qayb qaataayaasha badankoodu waxay helaan 36 oz. gargaarka siriylalka ah bil kasta.

- Qiyaasta ugu yar ee siriylalka ee aad gadan karto waa 11.8 oz. oo ah (siriylalka kulul) ama 12 oz. oo ah (siriylalka qabow). Haddii aad haysato wax ka yar 11.8 oz. oo ay ka soo hareen gargaarkaaga siriylalka, ma awoodi doontid in aad kharash garayso.
- Habka ugu fiican ee aad ku xaqijin karto in aad hesho siriylalkaaga oo dhan waa in aad gadato dhammaan sanduuqyada qiyastoodu tahay 12 oz., 18 oz., 24 oz. ama 36 oz.


Tusaalooyinka siyaabaha aad iskugu dari karto qiyasaha kala duwan ee baakada siriylalka




Wadarta 36 oz.



Wadarta 36 oz.



Wadarta 36 oz.



Wadarta 35.8 oz.

Shopping with your eWIC Card

Somali

TALOOYIN KU SAABSAN GADASHADA CUNTADA


Gadashada Casiirka

Lacagta cuntada ee kuu hartay fiiri si aad u ogato:

- Halka aad ka heli karto unto la qaboojiyyay ama cabitaanka dhalada ku jira
- Qiyaasta cabitaanka aad gadan karto

Remaining Balance (exp date 9-30-2020)		
3.50	gal	Fat free or 1% milk
1.00	gal	Whole milk
2.00	ctr	Peanut butter/ dry or canned beans
40.00	oz	Whole grains
16.00	\$\$	Fruit and vegetables
3.00	ctr	Frozen juice 11.5 - 12 oz
1.00	ctr	Bottle juice 64 oz
1.00	lb	Cheese

1.00 CTR waa:



11.5-12 oz la qaboojiyyay

Remaining Balance (exp date 9-30-2020)

3.50	gal	Fat free or 1% milk
1.00	gal	Whole milk
2.00	ctr	Peanut butter/ dry or canned beans
40.00	oz	Whole grains
16.00	\$\$	Fruit and vegetables
3.00	ctr	Frozen juice 11.5 - 12 oz
1.00	ctr	Bottle Juice 64 oz
1.00	lb	Cheese

1.00 CTR waa:



64 oz dhalooyinka caaga ah

TALOOYINKA PIN LAMBARKAAGA

Sameysyo PIN lambarkaaga ka hor inta aadan aadin adeegashada. Wac lambarka telefoonka ee ku yaala dhinaca dambe ee kaarka, ka dibna raac tilmaamaha lagu siiyay si aad u sameysato PIN lambarka.

- Isticmaal taariikh iyo cinwaan la mid ah ta aad siisay xarunta WIC ee loogu talagalay kaarkaaga (OGOW: tani maaha taariikhda dhalasho ee ilmahaaga).
- Haddii aad haysato qof labaad oo kaar leh, marka uu PIN lambar u yeelo kaarkiisa, wuxuu isticmaali karaa taariikhda dhalashada iyo cinwaan u gaar ah.

Haddii aad si qalad ah affar jeer u geliso PIN lambarkaaga, kaarkaagu wuu is xiri doonaa. Tixgeli in aad PIN lambarkaaga dib u sameysato ka dib marka 2-aad ama 3-aad ee la isku daydo.

Si aad dib ugu sameysato PIN lambarkaaga, wac lambarka telefoonka ee ku yaala dhinaca dambe ee kaarka ama booqo website-ka.

Si aad u furto PIN lambarkaaga, wac lambarka telefoonka ee ku yaala dhinaca dambe ee kaarka.



Shopping with your eWIC Card

Somali

SU'AALAH INTA BADAN LA ISWAYDIIYO

Maxaan u gadan kari laayahay tahani?

Haddii shay aad gadanayso uu noqon waayo mid ka mid ah cuntada WIC:

- Waxaa suuragal ah in aadan haysan lacag kugu filan oo kuu hartay oo loogu talagalay cuntadaasi.
- Waxaa laga yaabaa in uusan ahayn shay la ogolaaday oo ku jira Liiska Cuntada WIC.
- Haddii ay tahay mid loo qalmo, waxaa dhici karta in loo baahdo in lagu daro nidaamka WIC. Haddii ay tani dhacdo, shaqaalahi lacagta qabta ‘cashier’ ma beddeli karo tani ama kuuma ogolaan karo in aad cuntadaasi ku gadato kaarkaaga WIC.

Miyaan gargaaradayda u keydsan karaa bilaha soo socda?

Maya, gargaarada WIC waa in la isticmaala dhammaadka bisha. Haddii aad isticmaali waydo, waad luminaysaa.

Halkee baan ka soo adeegan karaa?

Waxaad ka soo adeegan kartaa dukaan kasta oo laga soo adeegto oo ku yaala MN oo qaata WIC. Khariidada dukaamada laga soo adeegyo ayaa laga heli karaa website-ka WIC ama WICShopper App.

Miyaan isticmaali karaa kaarka daacadnimida?

Haa, waxaa laguu ogol yahay in aad kaaraka daacadnimida ‘loyalty cards’ isticmaasho, aad mid ka mid ah gadato /lagu siiyo iyo waxyaale oo gaar ah marka aad wax ku gadanayso WIC.

Maxaan sameyn karaa haddii dukaanka ay cuntadu ka dhamaato?

Wax ka soo gado dukaan kale oo ay leedahay WIC. Lama oggola jeegaga gadaal laga isticmaalo ‘rain checks’, nooca IOU iyo kuwa beddelka ah.

Miyaan soo celin karaa cuntada aan ku gato kaarka eWIC?

Maya, cuntooyinka lagu gato kaarka eWIC lama soo celin karo ama laguma beddelan karo lacag caddaan ah, kaarka hadiyada ee dukaanka iyo alaab. Cuntooyinka WIC ayaa la soo celin karaa haddii la amray in dib loo soo celiyo ‘recalled’, ama burbur soo gaaray ama uu dhacay waqtigoodii markii aad gadatay.

Waxaan si kadis ah lacagtooda u bixiyay cuntadayda WIC aniga oo isticmaalaya lacag ii gaar ah ama kaarkayga Cayrta ee Oregon. Miyaan soo celin karaa cuntada?

Haa. Haddii aadan lacagta ku bixin kaarkaaga eWIC, dukaamada intooda badani way oggol yihiin in wax la soo celiyo iyada oo la haysto risiit.

